**Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)**

# HADALJEEDINTA UU ERGEYGA GAARKA AH EE XOGHAYAHA GUUD, JAMES SWAN, U JEEDIYAY GOLAHA AMAANKA EE KU SABSAAN XAALADDA SOOMAALIYA

12 Agoosto 2021

Mudane Madaxweyne, Xubnaha sharafta leh ee Golaha,

Waad ku mahadsantihiin fursadda aan kaga warbixiyo xaaladda Soomaaliya. Waxaan ku faraxsanahay inaan sidaas oo kale mar kale la sameeyo Wakiilka Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika ee Soomaaliya, Danjire Francisco Madeira. Tani waxay hoosta ka xarriiqaysaa muhiimadda xiriirka Qaramada Midoobay iyo Midowga Afrika u leeyahay horumarinta nabadda, amniga iyo xasilloonida Soomaaliya. Waxa kale oo aan ku faraxsanahay in ila warbixiyo Mudane. Danjire Abuukar Cusmaan, Wakiilka Joogtada ah ee Soomaaliya u fadhiya Qaramada Midoobey, iyo Marwo Batuulo Axmed Gaballe, Guddoomiyaha Guddiga U-doodida Haweenka ee dhowaan la magacaabay.

Mudane Madaxweyne,

Warbixintii ugu dambaysay ee aan siiyey Golaha waxay dhacday laba maalmood ka hor intaan la saxiixin Heshiiskii Hirgelinta Doorashooyinka ee 27 -kii May oo dhex maray Raysal -wasaare Maxamed Xuseen Rooble iyo hoggaamiyayaasha Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka. Waan ku faraxsanahay inaan soo sheego in horumar la taaban karo la sameeyay tan iyo markaas.

Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu muujiyey hoggaamin xooggan iyo hindise lagu dhaqaajinayo geeddi -socodka. Golaha Wada -tashiga Qaranka oo ay ka mid yihiin Ra'iisul Wasaaraha iyo madaxda Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ayaa kulamo iyo wada -hadal joogto ah ka yeeshay arrimo muhiim ah oo khuseeya hirgelinta Heshiiska.

Intaas waxaa sii dheer, waxaa la dhisay guddiyada maareynta doorashada ee heer Federaal iyo heer Dowlad -goboleed, waxaana doorashada kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka ay ka bilaabatay afar ka mid ah Dawladaha xubinta ka ah Federaalka. Guddiga heer wasiir ee loo igmaday oo ka kooban wakiilo ka socda Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ayaa Garbahaarey ku qabtay wadatashiyo loogu diyaar garoobayo doorashada Gedo. Guddiga Amniga Doorashooyinka Qaranka ayaa la dhisay oo bilaabay diyaar garow. Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu magacaabay Guddi U -doodid, oo Guddoomiyahoodu uu Golaha warbixin siin doono maanta, si ay u gaaraan qoondada haweenka ee 30% ah ee doorashada federaalka Soomaaliya ee 2021 -ka.

Isla mar ahaantaana, horumar dheeraad ah ayaa loo baahan yahay meelaha mudnaanta qaarkood. Tan waxaa ku jira diyaargarow xooggan oo faahfaahsan oo ku aaddan amniga doorashada, iyo caddaynta qorshayaasha lagu xaqiijinayo qoondada haweenka. Waxaan si gaar ah uga walwalsanahay haddii aan hadda la qaadin tallaabooyin adag, laga yaabo in aan la gaarin qoondada

haweenka. Waxa kale oo loo baahan yahay in si weyn loogu daro geedi -socodka doorashada dhallinyarada iyo beelaha la haybsooco taariikh ahaan.

Qaramada Midoobey waxay si dhow ula shaqeyneysay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo guddiyada maareynta doorashada ee heer federaal iyo heer dowlad -goboleed sidii loo hirgelin lahaa Heshiiskii 27 -kii May iyo diyaarinta doorashada. Tan waxaa ka mid ah bixinta taageero farsamo iyo saadka, iyo sidoo kale isku dubaridka kaalmada maaliyadeed ee caalamiga ah. Dhawaan, waxaa heshiis lala saxiixday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha si loo hubiyo in lacagaha deeq -bixiyeyaasha oo si deeqsinimo leh ay ugu deeqaan Dawladaha Xubnaha ka ah ay diyaar u yihiin inay adeegsadaan Hay'adaha Maareynta Doorashada.

Marka ay soo ifbaxaan caqabadaha mustaqbalka ee ku aaddan hirgelinta heshiiska iyo dhammaystirka geeddi -socodka doorashada, waxaan ku boorrinaynaa inay sii wadaan wax -ka -qabashadooda iyo in lagu xaliyo wadahadal.

Mudane Madaxweyne,

Marka laga soo tago geeddi socodka doorashada, Qaramada Midoobay waxay sii wadaa inay taageerto dadaallada ballaaran ee nabad dhisidda, oo ay ka mid tahay xoojinta federaalka, ka hortagga iyo maareynta khilaafaadka, iyo adkeynta nabadda. Arrintan, waxaan xusuusannaa in Heshiiskii 27-ka May uu ku jiro qorshe hawleed lagu dhammeystirayo geedisocodka dawlad dhisidda Soomaaliya, waxaanan rajaynaynaa inaan taageerno hirgelintiisa.

Iyadoo maalgelin laga helayo Sanduuqa Dhismaha Nabadda, Qaramada Midoobay ee Soomaaliya ayaa sidoo kale xoojin doonta taageeradooda ku aaddan hirgelinta Qaraarka Golaha Ammaanka ee 1325 iyo doorka haweenka ee dhisidda nabadda iyada oo loo marayo barnaamij cusub oo wax looga qabanayo caqabadaha ku saleysan nidaamka ee hortaagan matalaadda haweenka Soomaaliyeed iyo ka qaybgalkooda nolosha dadweynaha.

Mudane Madaxweyne,

Diyaargarowga sugidda amniga doorashadu waa muhiim khatarta joogtada ah ee Al-shabaab aawadeed. Al-Shabab waxay sii wadaa weerarada argagaxisada iyo hawlgalada kacdoonka, oo ay ku jirto isku hareeraynta bulshooyinka; gaar ahaan sida Dowlad Goboleedka Koonfur-Galbeed oo kale.

UNSOM ayaa illaa hadda inta lagu guda jiray 2021 diiwaan gelisay warbixinno ku saabsan waxyeellada 708 qof oo shacab Soomaaliyeed ah (321 la dilay, 387 la dhaawacay), oo inta badan loo aaneeyo Al-Shabaab. Waxa kale oo jira koror aad u xun oo ku saabsan xadgudubka galmada iyo xadgudubyada ka dhanka ah carruurta ee la diiwaangelinayo kuwaasina weli waa aagga mudnaanta u leh Qaramada Midoobay.

Mudane Madaxweyne,

AMISOM waxay sii wadaa inay kaalin muhiim ah ka qaadato Soomaaliya. Waxaan ammaan usoo jeedinayaa dhammaan shaqaalaha AMISOM iyo Ciidamada Ammaanka Soomaaliya, oo si wadajir ah maalin walba uga wada shaqeeya sidii dalka nabad loogu soo dabaali lahaa. Kuwo aad u badan ayaa naftooda u huray.

Xafiiska Taageerada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOS) wuxuu sii wadaa inuu taageero muhiim ah siiyo AMISOM iyo Ciidamada Amniga Soomaaliyeed.

Caawinta UNSOS ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxaa suuro geliyay tabarucaadka Qaaraanka ee Sanduuqa Amaanada. Qaaraanno deeqsinimo leh oo dheeri ah ayaa si degdeg ah loogu baahan yahay si loo sii wado taageeradan muhiimka ah ee la siinayo ciidamada ammaanka ee Soomaaliya, oo uu goluhu u xil saaray.

Qorshaha kala guurka Soomaaliya weli waa la fulinayaa. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah himilooyinkii 2021-ka ayaan weli la gaarin, oo ay ku jiraan adkeynta Shabeellada Hoose iyo guulo kale oo laga gaaray Dowlad Goboleedka Hirshabelle. Waxaan ognahay, si kastaba ha ahaatee, howlgalladii ugu dambeeyay ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee lagula dagaallamayo Al -Shabaab ee ka dhacay Dowlad Goboleedyada Hirshabelle iyo Galmudug.

Mudane Madaxweyne,

Xaaladda bani'aadamnimo ee Soomaaliya ayaa weli ah mid aad u daran. Saamaynta wadajirka ah ee colaadda iyo isbeddelka cimilada, oo ay ku jiraan abaaraha iyo daadadka soo noq noqonaya, iyo sidoo kale COVID, waxay u badan tahay inay sii xumeeyaan cunno yarida. Waxaan jeclaan lahaa inaan xuso hoggaanka Dowladda Federaalka ee Soomaaliya oo bilaabay olole tallaal oo heer qaran ah, iyagoo taageero ka helaya hindisaha Covax.

Helitaanka gargaarka bani'aadannimo iyo maalgelin aad u badan ayaa loo baahan yahay si loo sii wado bixinta gargaarka nolol bad baadinta. Qorshaha Waxqabadka Bani’aadannimada ee 2021 waxaa la maalgeliyay oo kaliya 38 boqolkiiba.

Isbedelka cimiladu wuxuu gacan ka geysanayaa dhibaatada ba'an ee ka jirta Soomaaliya, oo saamayn taban ku yeelan karta xasilloonida iyo amniga, iyo weliba xaaladda bani'aadannimada iyo horumarka. Goluhu wuxuu aqoonsaday saamaynta xun ee isbeddelka cimiladu ku yeelan karo Soomaaliya, Qaramada Midoobayna waxay sii wadaa inay kala shaqayso heerarka Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka si si fiican loogu fahmo, loo yareeyo loona maareeyo arrintan.

Gabagabadii, Mudane Madaxweyne,

Kadib muddo dheer oo hubanti la’aan iyo xiisado sii xoogeystay ah, doorashooyinkii muddada la sugayey ee Soomaaliya ayaa hadda horey u socda, inkasta oo ay xoogaa dib uga dhacday jadwalkii. Xaqiijinta in geeddi socodkan uu sii socdo, yahayna mid loo dhan yahay oo lagu kalsoonaan karo, wuxuu uga baahan doonaa dadaal joogto ah dhammaan dhinacyada ay khusayso, iyo hoggaaminta sii socota ee saxiixayaasha heshiiska 27 May.

Qaramada Midoobay waxay diyaar u tahay inay sii waddo taageerada Soomaaliya ee geeddi socodkan doorashada iyo wixii ka dambeeyaba, si dalku u cusbooneysiiyo diiraddiisa ku aaddan hiigsiyadiisa asaasiga ah ee nabadda, amniga, iyo hormarka.

Mahadsanid